

**ABUURKA
FURSADDA,
XASILINTA
AYAHEENNA**

MIISAANIYADDA ONTARIO EE 2014



MIISAANIYADDA ONTARIO EE 2014

AYAA SOO BANDHIGAYSA QORSHE LOOGU TALAGALAY ONTARIO, LEHNA
SHAQOYIN KA BADAN

**FURSADO KA
BADAN IYO
MUSTAQBAL KA
XASILLOONAAN
BADAN SIDII HORE**



Qorshuhu wuxuu abuuri doonaa shaqooyin oo u kobcin doonaa dhaqaalaha iyada oo la maalgashado dadka, oo la dhiso kaabayaal casri ah, la taageerana jawi ganacsi firfircoon oo cusub.

Difisidka 2013–14 ayaa hadda lagu qiyaasay inuu noqdo \$11.3 bilyan - iyada oo ah ka horumar \$0.4 bilyan marka loo eego saadaalintii miisaaniyaddii 2013. Taas ayaa tilmaamaysa sannadkii shanaad ee isku daba xigay ee Gobolku ka warbixiyay difisid ka hooseeya sidii la saadaaliyay. Dawladda ayaa wali u heellan sidii loo dheelli-tiri lahaa miisaaniyadda kama dambaynta 2017-18.

Miisaaniyadda 2014 ee Ontario wuu ka soo jeedaa oo u jeedaa dadka reer Ontario.

ABUURISA SHAQADA



Qorshaha Dhaqaale ee 10ka-sano ayaa siiin doona Ontario aaladaaha lagu noqodo xarun awood caalami ah leh iyada oo siisa reer Ontario fursadaha loogu guurayo xirfado shaqo cusub iyo shaqooyin lacag ka badan bixiya, kana midka yihiin:

- Abuuritaanka Fuundo Shaqooyin iyo Barwaaqo cusub oo 10-sano iyo \$ 2.5 bilyan ah iyada oo lala kaashado meheradda oo markaa soo jiidanaysa maalgashiyada, oo xoojinaysa qaybaha halbowlaha u ah Ontario, markaana taageeraysa koritaanka dhaqaale ee mustaqbalka gobolka.
- Siinta meheradha yaryar aaladaha ay u baahan yihiin inay ku keydsadaan tamarta, kuna maareeyaan kharashka oo lacagtana ku dhaqaalaystaan.
- Ka caawin meheradaha waawayn kharashkooda korontada.
- Ballaadhinta gaadhsiista waxayaabaha ay u dhoofiso Ontario suuqaqa dhakhsaha u koraya, si looga caawiyo meherado yaryar iyo meheradaha dhexdhexaadka ah oo badan inay koraan oo shaqooyin abuuraan.

MAALGASHIGA GAADIIDKA IYO KAABAYAASHA



Kordhitaanka dadka Ontario ee la saadaaliyey ayaa ku dambayn doonta baahi weyn oo loo qabi doono dhammaan noocyada kala duwan ee kaabayaasha ah. Taasi weeye sababta ay Gobolku u qorsheysaneyso inay ku maalgaliso in ka badan \$130 bilyan kaabayaasha dadweynaha illaa 10ka-sano ee soo socoda, kana mid yihiin:

- U qoondayn iyo u diyaarin lacag ku dhawaad ah \$29 bilyan illaa 10ka-sano ee soo socoda looguna talagalay kaabayaasha gaadiidka ee ka jira gobolka oo idil.
- Maalgalinta wadar ahaan ah \$ 2.5 bilyan gudaha 2014-15 ee loogu talagalay dib u hagaajinta jid weynaha iyo mashaariicda ballaarinta ee gobolka oo idil ah.
- Ku taageeridda waddooyinka iyo buundooyinka degmada foondo joogto ah oo cusub \$100 milyanna ah.

XASILINTA HAWLGABKA REER ONTARIO



QORSHAHA
BENSHINKA
KANADA

+



HAQABBEEL
WAAYEEL

+



KEYDSI
SHAQSI

+



ONTARIO
HAWLGABKA
BENSHINKA
QORSHE

Si looga caawiyo reer Ontario, gaar ahaan kasbadayaasha dakhliga dhexe, sidii ay isku hallayn lahaayeen hawlgabkooda, Miisaaniyadda Ontario ee 2014 ayaa soo jeedineysa qorshe hawlgab gobol kii ugu horreeyay ee noocaas ah oo ku dhisan Qorshaha Benschinka Kanada (CPP).

Xoojinta CPP ayaa lahaan doonta faa'iidooyin dhaqaale muddo-dheer ah, iyada oo la kobciyo dhaqaalaha oo la abuurto shaqooyin, halka laga siinayo hawlgabka sii xasil badan dhammaan dadka shaqeeya reer Kanada . Iyada oo la ogyahay go'aanka dowladda federaalka ah ee joojiinta ka hadalka xoojinta benschinka CPP, Ontario ayaa soo saari doonta xal "lagu dhex-sameeyey-Ontario" oo ah- Qorshaha hawlgabka benschinka Ontario (ORPP).

ORPP ayaa:

- Ku dul dhisi doonta astaamaha ugu muhiimsan ee CPP, oo ay ka midka yihiin dheefta hawlgabka bishii kasta ee la saadalin karo loona xisaabiyay sicir bararka la bixiyo cimiriga oo idil.
- Kordhin doonta kaydanka hawlgabka iyada oo saamiyada ku-biirsga in hooseysa ku hayn doonta.
- Ayaa la soo saari doonaa gudaha 2017, lagana bilaabo loo-shaqeeyeyaasha waawayn, wax ku biirintana ayaar loo galiyo muddo laba sannadood gudaheed.
- Ayaa kordhin doonta heerka kasbashada hoos yimaad ee ka baxsan waxa hoos yimaad CPP.

HOOS U DHIGGA QIIMAHA TAMARTA



ABABINTA BULSHO CADAALAD LEH



Dowladda ayaa ka caawinaysa reer Ontario kharashka tamarta , ay ka midka yihiin:

- Hoos u dhigga kharashyada nidaamka 18kii bilood ee la soo dhaafay, yaraynta waxa ay dadku bixin lahaayeen haddii kale illaa ku dhawaad \$520 muddada ah shanta sano ee soo socda.
- Soo jeedin in laga daayo Kharashka Ku Dallaca Hawlgabka Deynta biilasha korontadaisticmaalayaasha goobaha deggan ka dib Disember 31, 2015, iyada oo taasi u dhaqaalayneyso cashuur bixiyaha caadiga ah qiyaastii illaa \$70 halkii sano.

Dadaallada dowladda ee ku caawinta siinta fursadeed ee loogu talagalay reer Ontario oo dhan waxaa ka mid ah:

- Kordhinta iyo soo-jeedinta in lagumuujiyo Dheefta Ubadka Ontario.
- Ku sii wadidda in wax laga beddelo nidaamka kaalmada bulshada iyada oo loo marayo kordhin saami iyo iyada oo la isku-dubbarido dheefaha shaqada.
- Fidinta Barnaamijka Nafaqada Ardayda si loogu adeego carruur ka badan intii hore oo ka tirsan xaafadaha dakhligoodu hooseeyo iyo dhulal-u-qoontaynta First Nation.
- Iyada oo sare loo qaado nushqaayadda ugu yaraanta ah illaa \$ 11, lana soo jeediyo in lagu xiro sicir-bararka sidii loogu noqon lahaa cadaalad shaqaalaha dakhligoodu hooseeyo iyo saadaalin karitaanka meheradaha.
- Iyada oo laga sii wanaajiyo taageerooyinka loogu talagalay dadka qaan-gaarka ah ee le naafada koabca leh iyo shaqaalaha safka hore kaga jira shaqada qaybta adeegga beesha.
- Bixinta taageerada u kordhinta mushqaayadda shaqaalaha taageerka shaqsiga guri ay kharash gareyso dowladdu iyo qaybta daryeelka bulsho ee dawladdu maalgaliso, iyo shaqaalaha safka hore kaga jira daryeelka ubadka.

WEYDDIISADKA CADAALADNIMDA DOWLADDA FEDERAALKA AH



MAARAYNTA XILKASNIMO LEH



Sannad kasta, saamiga dakhliga federaalka ee laga soo saaro Ontario ayaa ka badan saamiga kharashaynta federaaliga ah ee Ontario. Taasi waxay keentey in \$ 11 bilyan oo farqi ahi u dhexeeyo waxay reer Ontario bixiso marka loo eego waxay ka helaan dawladda federaalka ah.

Dowladda Ontario waxay ugu baaqaysaa dawladda federaalka ah inay:

- Ula dhaqanto dadka reer Ontario si isku mid ah degganayaasha gobollada kale.
- Ka ilaaliso Ontario ee hoos u dhaca \$641 milyan ee wareejimaha waawayn ah gudaha 2014–15, sidii ugu samaysay gobollada kale wakhtiyadii tagay.
- Si aad u badan in loo kordhiyo foondaynta loogu talagalay kaabayaasha, oo ay ku jirto bixinta u-dhiganka ee ah ballan-qaadka horumarinta Ontario ee \$1ka bilyan ah looguna talagalay mashruuca Ring of Fire.

Ontario ayaa leh ta ugu hooseysa ee barnaamij kharashayn qofkii-kasta ah marka loo eego gobollada, isla marka iyada oo bixisa adeegyo dadweyne oo tayo sare leh. Waxaa iska ilaalinta wax daadaadinta, oo diiradda la saaro wixii u mudnaanta leh iyo in la hubiyo in doollar kasta la isticmaalo, oo waxtar u yeesho.

Geeddi-socodkaas, haddaba dowladdu waxay:

- Soo saari doontaa barnaamij sannadeed di-u eeg lagu dhaqaalaysano oo bartilmantu tahay \$250 milyan 2014–15 iyo \$500 milyan midkood kasta 2015-16 iyo 2016-17.
- In lagu sii wado ku baaqa in mushaaraadka Xubnaha Baarlamaanka Gobolku meeshooda ahaadaan illaa inta miisaaniyadda la dheellitirayo.
- In si toos ah loogu xakameeyo magdhowga agaasimayaasha sare ee qaybta ballaaran ee dowladda, shuruud ah in la gudbiyo sharci-dejin.
- In lagu hakiyo koritaanka celceliska sannadlaha ah ee kharashaynta barnaamijka illa 1.1 boqolkiiba illaa saddex sano.

2014 MIISAANIYADDA ONTARIO

WAX INTAA KA BADAN KA
OGOW

ONTARIO.CA/BUDGET

LACAG LA'AAN: 1-800-337-7222

TTY LACAG LA'AAN AH: 1-800-263-7776

